



# Talo-cusub ee Kahortagga Rabshadda Dhaliyarada Seattle

## AASAASKA

Talada cusub ee “Seattle Youth Violence Prevention Initiative” waxay ku waajahaysaa arrinta rabshada dhaliyarada qaab isku-dhahan oo isku-daraya istraatiijiyada ku salaysan caddaymo ka abuurmay guriga, iyo barnaamijyo ay abuureen bulshada iyo dhalinyaradu. Iyada oo ay Seattle soo martay tirada guud ahaan ee denbiyada ee ugu hooseeyey sannooyin, hadana tirada dhacdooyinka rabshadaha denbiga wata ee ciyaala-suuqnimadu waxay weli yihiin arrin muhiim ku ah bulshada. Magaaladu waxay soo saartay Taladan Cusiub gudaha Juulaay 2009 si guud ahaanba loo bedelo sida ay magaaladu ula tacaasho rabshadda dhalinyarada.

## HADAFKA

Himilooyinka taladan cusub waa in la gaadho yaraynta 50% ciyaala suuqnimada rabshadaha wata ee dhalinyarada ee keena cayriska iyo dugsi ka-joojinta dugsiyo dhexe oo la xulay ee ka xidhiidha dhacdooyinka rabshadaha wata.

## AYAA U QALMA?

Taladan cusub waxay culayska saaraysaa illaa 800 oo dhalin ah da'da 12-17 oo:

- lagu oogay denbiyo rabshadeed oo la sii daayey;
- la qabtay laakiin aan xidhnayn;
- ah ardayda dugsiyo dhexe oo halis u ah goysmao dugsi ama dugsi ka-joojin soo noqnoqota oo la xidhiidha dhaqan rabshad leh; iyo/ama
- ahaa dhibanayaal rabshad ka dhacday xaafadooda.

Kala-duwanaanta da'yarta waa ballaadhan yahay oo baahidooduna waa kala duwan tahay. Da'yarta qaar ee qaba baahiyaha badan waxay heli doonaan adeegyo daaweyn ku-salaysan oo xooggan. Kuwa kale waxay heli doonaan adeegyo ka gargaara helitaanka fursadaha ay ku sameeyaan ikhtiyaaro wacan.

Talada cusub ee Seattle waxay isku daraysaa hogaamin iyo walxo ka yimid barnaamijyo guul ka keenay ka-hotagga rabshada magaalooyin kale. Farriin rasmi ah oo si dheer oo waadix kaga timid magaalooyin kale waa in dawladdu aanay qeexin faahfaahinta qorshaha talada cusub. Raacitaanka taladaas, Magaaladu waxay kobcisay qorshe ku dhisan hogaaminta bulshada. Tan waxa lagu sameeyey samaynta wakaalado ku salaysan bulshada oo lamaano ahaan hogaaminaya saddex isku-xidh xaafadeed oo laga aasaasay Badhtanka, Koonfur-galbeed iyo Koonfur-galbeed Seattle.

## WAAYO WAKAALADHA ISKU-XIDHKA EE XAAFADDA?

Wakaaladaha hogaaminta ee isku dubaridka dedaalka talada cusub waa: Therapeutic Health Services; Southwest Youth and Family Services; iyo wakaalado kale oo uu hogaamiyo Rainier Vista Boys iyo Girls Club.

## MAXAY YEHIIN ADEEGYADU?

Da'yarta waxa loo gudbin doonaa adeegyada iyada oo loo marayao dugsiyo, wakaaladaha bulshada, maxkamadaha dhalinta, booliiska, shaqaalaha bulshada ee jidadka, iyo Xarumaha Dhalinta ee Jardiinooyinka iyo Madadaalada Seattle. Kala-duwanaanta adeegyada heer bulsho la isugu dubarido waxa ka mid ah:

- hawlaha bulsho ee jidadka
- maaraynta kiiska
- maaraynta cadhada
- la-talinta
- shaqaalaynat da'yarta iyo tababarka
- Mashaariicda Iswaafajinta Maaliyadda ee u adeega dhalinta u-qalanta
- Barnaamijyada le saacadaha dheeraadka ah ee Xarumaha Jardiinooyinka ee Da'yarta

Waxa dheer, dugsiyo “soft uniformed” waxay culays saaraan saraakiil loo idmay afar dugsi oo dhexe – Aki Kurose, Mercer, iyo

Washington Middle Schools iyo South Shore K-8. Xubin kale oo muhiim ka ah talada cusub waa kooxda hawlaha jidadka oo ka kooban dad leh waayo-aragnimada jidadka oo kula kulma da'yarta “meesha ay joogaan.” Saraakiisha saldhigoodu yahay dugsiyo shaqaalaha jiddka waxay dhagaysan, siin da'yarta hogaamin, macluumaad, ka gargaari xalinta khilaafaadka oo ku dhiirgelin inay sameeyaan ikhtiyaaro caafimaad oo san.

Kahor bilowga talad cusub, booliiska Seattle waxay kordhiyeen askarta ilaalada, libinlaabeen tirada saraakiisha la shaqaysa unugga qawlaysatada. Koox cusub oo la dagaalanta qawlaysatada maalintii ayaa ka shaqaysa hareeraha dugsiyo si ay u kaabaan laba unug ee habeenkii.

## MAALGELINTA

Magaaladu waxay ku maalgelinaysaa \$8 milyan talada cusub muddada 2009 iyo 2010, oo bixin doonta adeegyada iyo barnaamijyada ku taxan xaashidan.

## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

### Mariko Lockhart

Agaasimaha, Seattle Youth Violence Prevention Initiative  
[mariko.lockhart@seattle.gov](mailto:mariko.lockhart@seattle.gov)  
206-233-7915

### Jamila Taylor

Central Neighborhood Network Coordinator  
[jamilat@THS-WA.org](mailto:jamilat@THS-WA.org)  
206-402-1030

### Nani Fatuesi

Southwest Neighborhood Network Coordinator  
[nfatuesi@swyfs.org](mailto:nfatuesi@swyfs.org)  
206-937-7680 ext. 109

### Heidi Henderson-Lewis

Southeast Neighborhood Network Coordinator  
[hhendersonlewis@positiveplace.org](mailto:hhendersonlewis@positiveplace.org)  
206-436-1898

### Internetka:

[www.safeyouthseattle.org](http://www.safeyouthseattle.org)

